



# Tilmaamaha kusaabsan sida looga Talo Bixiyo

## Qabyo-Qoraalka Saamaynta Bay'ada: Draft Environmental Impact Statement (DEIS)

Sharciyada Bay'ada Gobolka iyo kan Dawlada-dhexe waxay waajib ka dhigayaan in Qabyo-Qoraal kan kusaabsan Saamaynta Bay'ada (Environmental Impact Statement) laga diyaariyo mashruuca la soo jeediyay ee Southwest Transitway. Hawshan waxaa ka mid ah diyaarinta Qabyo-Qoraal ka Saamaynta Bay'ada oo ay qasabtahay in loo soo bandhigo dadweynaha si ay u akhriyaan talo soojeedina uga smeeyaan.

Qabyo-Qoraalkani waxuu ka hadlayaa: (1) ujeedada iyo baahida loo qabo mashruuca; (2) talooyinka kale ee la tixgeliyay; (3) saameynta talooyinka kale; iyo (4) Hay'adaha iyo dadka lala hadlay.

**Talo kabixinta kusaabsan Qabyo-Qoraalkan waxaa la ogolyahay ilaa December 11, 2012.** Talo- bixinta ku saabsan Qoraalkaan waxaa lagu soo gudbin karaa email, boostada, ama qof ahaan inaad timaado goobaha loogu talagalay dhagaysiga dadwaynaha. Si aad in badan uga ogaatid siyaabaha looga looga talo- bixiyo Qabyo-Qoraalkan, fiiri "Sida Looga Talo-bixiyo Qabyo-Qoraalka (DEIS)."

**Dhageysiyada Dadweynaha ee ku saabsan Qabyo-Qoraalkan waxaa la qaban doonaa bisha November 2012.** Si aad in badan uga ogaatid dhageysiyada, fiiri "Dhageysiyada Dadweynaha."

## Helitaanka Koobiga Qoraalkan

Qabyo-Qoraalkan iyo qeybaha gadaal uga lifaaqan waxaa laga heli karaa bogga internetka Hennepin ee Southwest Transitway: <http://www.southwesttransitway.org>.

Dadweynuhu waxay koobiyada Qabyo-Qoraalkan oo daabacan kaheli karaan:

### Hennepin County Housing, Community Works & Transit

701 Fourth Avenue South, Suite 400, Minneapolis

### Maktabadaha

**Eden Prairie:** 565 Prairie Center Drive, Eden Prairie  
**Edina:** 5280 Grandview Square, Edina  
**Franklin:** 1314 East Franklin Avenue, Minneapolis  
**Hopkins:** 22 Eleventh Avenue North, Hopkins  
**Linden Hills:** 2900 West 43rd Street, Minneapolis  
**Minneapolis Central:** 300 Nicollet Mall, Minneapolis  
**Minnetonka:** 17524 Excelsior Blvd., Minnetonka  
**Sumner:** 611 Van White Memorial Blvd., Minneapolis  
**St. Louis Park:** 3240 Library Lane, St. Louis Park

### Xafiiska Mashruuca Southwest LRT

6465 Wayzata Blvd., Suite 500, St. Louis Park

### Dawladaha Hoose

**Eden Prairie:** 8080 Mitchell Road, Eden Prairie  
**Edina:** 4801 West 50th Street, Edina  
**Hopkins:** 1010 First Street South, Hopkins  
**Minneapolis:** 350 South Fifth Street, Minneapolis  
**Minnetonka:** 14600 Minnetonka Blvd., Minnetonka  
**St. Louis Park:** 5005 Minnetonka Blvd., St. Louis Park

Hadaad u baahantahay inaad hesho macluumaadka Qabyo-Qoraalkan oo noockale oon qoraal ahayn ah, fadlan la xariir Hennepin County Housing, Community Works & Transit Department, 701 Fourth Avenue South, Suite 400 Minneapolis, MN 55415, tell: 612.348.9260, email: [swcorridor@co.hennepin.mn.us](mailto:swcorridor@co.hennepin.mn.us).

## Ku Saabsan Southwest Transitway

Southwest Transitway waa wado tareen dhererkeeduna yahay 15-mayl oo la soo jeediyay in laga dhiso Gobolka Minneapolis/St. Paul, taasoo ku xiraysa Farasmagaalaha (Downtown) ka Minneapolis goobaha dhaqdhaqaaqu ka socdo, ee kuyaal Hennepin County, Minnesota, sida magalooyinka St. Louis Park, Hopkins, Edina, Minnetonka, iyo Eden Prairie. Iyadoo la tixraacayo talooyinka qiimaynta lagusameeyay waxaa kale oo Qabyo-Qoraalkan kujira:

- Dib u meeleynta adeegga tareenka iminka jira ee qaada xamuulka Twin Cities iyo Western (TC&W) laga bilaabo Bass Lake Spur ee Canadian Pacific (CP) iyo Cedar Lake (Kenilworth Corridor), (Hennepin County Regional Rail Authority (HCRRA) ilaa Minneapolis Northfield & Southern (MN&S) Railway Subdivision iyo Burlington Northern Santa Fe's (BNSF's) Wayzata Subdivision; ama
- Isku garabdhiska ama isku kordhiska wadada tareenka adeega dadwaynaha (LRT) iyo midka adeega xamuulka ee (TC&W) freight rail, Lake Sur iyo Cedar Lake (Kenilworth Corridor).

Ilaa bartamihii (1980 maadkii) sideetameeyadii Hennepin County Regional Railroad Authority (HCRRA) iyo dawladda Gobolka waxay daraasad ku sameeyeen suurtagalnimada waddo tareen oo marta Koofur Galbeed Twin Cities. Mashruuca Southwest Transitway waxaa iminka uu kamidyahay Qorshaha Siyaasadda Gaadiidka ee 2030 (2030 Transportation Policy Plan), qorshahan waa kan ugu mudada dheer ee dhanka gaadiidka ee gobolka; kan ugu muddada dheer ee Hennepin County; Qorshaha Diyaarinta Nimaadka Gaadiidka Hennepin County (Transportation System Plan, TSP); iyo qorshaha dhamaystiran ee gaadiidka dawladda hoose, ee goobaha daraasada lagu sameeyay.

Southwest Transitway waxay ka mid tahay waddooyinka gaadiidka lagu qeexay Qorshaha Siyaasadda Gaadiidka 2030 ee Hay'ada dawliga ah ee Metropolitan Council si ay u horumariso adeegga gaadiidka. Goobaha daraasada lagusameeyey ee Southwest Transitway, waxaa sii kordhaya tirada dadka iyo shaqada, iyadoo waddooyinka gaadiidku aaney xamili Karin baaxada kororkaas. Taasina waxay kordhinaysaa waqtiga safarka gaadiidka iyo wasaqda kubaxaysa hawada. Si balaaran ayaa looga shaqeeyay qaybo ka mida daraasada Mashruucan. Waxaana lafilayaa in horumarka cusub iyo dib u dhiska goobaha daraasada in ay kordhiyaan baahida loo qabo safarka gaadiidka.

## Ku Saabsan Qabyo-Qoraalkan

Ujeedada ugu muhiimsan ee Qabyo-Qoraalkan waa in dadka go'aamada gaara lagu kaalmeeyo qiimeynta saameynta la xariirta mashruucan. Qoraalkani waa dukumiintiga ugu muhiimsan ee fududeynaya dib u eegista Dawlada-dhexe, tan Gobolka, hay'adaha deegaanka iyo dadwaynuhu ku samaynayaan mashruuca lasoo jeediyey. Qabyo-Qoraalkan waxuu qorayaa ujeedada iyo baahida looqabo mashruucan, waxuuna soo bandhigayaa dood kusaabsan talooyinka latixgaliyey. Dukumiintigu waxuu kaloo si tafatiran uga hadlayaa saamaynta gaadiidka mustaqbalka ay ku yeelan karaan bay'ada iyo sida ugu haboon ee wax looga qaban karo loona cabiri karo waxqabadkaas.

Qabyo-Qoraalkan Saamaynta Bay'adu waxuu qorayaa saamaynta suurogalka ah kahor inta Dawlada-Dhexe aaney ku dhaqaaqin talaabo rasmi ah si loo hirgaliyo mashruucan. Qoraalkani waxuu ka hadlayaa waxyeelada ay bay'ada ugaysan karaan dhowr kamida talooyinka dhismaha, iyadoo la tixgalinayo ku biirinta laga helo Dawlada-dhexe, tan Gobolka iyo Hay'adaha deegaanka. Qormadaan waxaa loo qaybindoonaa dhinacyada ay qusayso, sida Muwaadiniin gaara, ururada bulshada, kuwa ganacsatada, madaxda ladoortay, iyo ururada dadwaynaha si waafaqsan shuruucda Dawlada-Dhexe iyo tan gobolkaba.

Maamulka Gaadiidka Dawlada-dhexe (Federal Transit Administration, FTA) ayaa hogaaminaya mashruucan Dawlada-dhexe ahaan, iyadoo ka hoos shaqaynaysa hay'ada NEPA, halka (Hennepin County Regional Railroad Authority, HCRRA) ka hogaaminayso gobolka ayna ka hoos shaqaynayso (Minnesota Environmental Policy Act, MEPA) xagga horumarinta Qabyo-Qoraalkaan. Laga soo bilaabo September 2, 2011 markii la ogolaaday in mashruuca Southwest Transitway lagu daro barnaamijyada cusub ee Dawlada-dhexe, hay'ada Metropolitan Council ayaa waxa ay noqotay hay'adda hormuudka u ah fulinta mashruucan, Dawlada-dhexena wakillka uga ah tan Gobolka.

## Sida Talo Looga Bixiyo Qoraalkan

Xiliga talo bixintu waxay ku egatahy bisha December 11, 2012. Waxaa jira siyaabo dhowr ah oo looga talo bixin karo Qabyo-Qoraalkan

- Qof ahaan in hadal laga soo jeediyo dhageysiyada dadweynaha. Shakhsiyaadka waxaa la siin doonaa labo daqiiqo oo ay ku hadlaan; kuwa matala kooxo waxaa la siin doonaa saddax daqiiqo. Goobaha iyo waqtiyada dhageysiyada dadweynaha waxay ku qoran yahiin hoos.
- **Udir qoraalkaaga talo bixinta:** [swcorridor@co.hennepin.mn.us](mailto:swcorridor@co.hennepin.mn.us)
- **Buuxi foomka talo bixinta aad ka heli karto Barta Internet ka:** [www.southwesttransitway.org](http://www.southwesttransitway.org)
- **Boostada ku dir talo bixintaada:**  
Hennepin County  
Housing, Community Works & Transit  
ATTN: Southwest Transitway  
701 Fourth Avenue South, Suite 400  
Minneapolis, MN 55415
- **Buuxi foomka talo bixinta,** kaasoo laga heli karo goobaha loogu talo galay ee dadweynaha

Muddada talo bixinta kaddib, Maamulka Gaadiidka Dawlada-dhexe (Federal Transit Administration, FTA) iyo hay'ada Metropolitan Council waxay tixgelin doonaan dhamaan talooyinka la soo gudbiyay, waxayna jawaabta ay ka bixiyaan waxyaabaha la taaban karo ee ku jira talooyinka ku soo dari doonaan nuqulka ama qoraalka ugu dambeeya ee Saameynta Bay'ada (Final Environmental Impact Statement, FEIS).

## Dhageysiyada Dadweynaha

Hennepin County Regional Railroad Authority (HCRRA) waxay dadweynaha u qaban doontaa saddax dhageysi oo ku saabsan Qabyo-Qoraalkan. Dhageysi kasta oo rasmi ahaan loo qabto dadweynaha waxa uu noqon doonaa mid furan.

<b>November 13, 2012</b> <b>(Talaado)</b>	<b>November 14, 2012</b> <b>(Arbaco)</b>	<b>November 29, 2012</b> <b>(Qamiis)</b>
<b>Hennepin County Government Center</b> 300 Sixth St., Room A-2400 Minneapolis, MN	<b>St. Louis Park City Hall</b> 5005 Minnetonka Blvd. St. Louis Park, MN	<b>Eden Prairie City Hall</b> 8080 Mitchell Road Eden Prairie, MN
Soo dhawayn Furan 4:00–5:00 galabnimo* Dhageysiga Dadweynaha: 4:30 galabnimo	Soo dhawayn Furan: 5:00–6:00 galabnimo Dhageysiga Dadweynaha: 6:00 maqribnimo	Soo dhawayn Furan: 5:00–6:00 galabnimo Public Hearing: 6:00 maqribnimo
* Public Service Level (Dabaqa Adeegga Dadweynaha, dabaqa skywayga leh)		

Ujeedada dhageysiyadaan waa in laga talo bixiyo waxa ku qoran Qabyo-Qoraalkan Saamaynta Bay'ada; lama qaadi doono wax talaabo ah.

Hadii lacodsado, waxaa la diyaarin doonaa turjumaano u turjuma dadka aan ku hadlin Ingiriisiga ama aanan wax maqal. Si aad u codsatid noocwalba oo turjumaan ah, fadlan la xariir Hennepin County Housing, Community Works & Transit Department (tell. 612.348.9260, email: [swcorridor@co.hennepin.mn.us](mailto:swcorridor@co.hennepin.mn.us)) ugu yaraan 14 maalmood ka hor xiliga dhagaysiga dadweynaha.

## Mowduucyada looga hadlay Qabyo-Qoraalka

Mowduucyada lagu baaray Qabyo-Qoraalkan waxaa qeexay shuruucda bay'ada Gobolka iyo tan Dawlada-dhexe. Mowduucyadaan waxaa looga hadlay 12 cutub iyo lifaaqyo ay ku jiraan qoraalo, khariirado, sawiro, sawir gacmeedyo iyo lifaaqyo kale oo laga helo macluumaad. Waxaa kale oo lagu soo daray warbixintaan soo koobid kusaabsan Saamaynta Bay'ada.

### Mowduucyada looga hadlay Qabyo-Qoraalkan waxaa ka mid ah:

1. Ujeedada iyo Baahida loo qabo Mashruuca
2. Talooyinka Kale ee la Tixgeliyay
3. Saamaynta ay kuleedahay Bulshada
4. Saamaynta ay kuleedahay bay'ada
5. Saamaynta ay kuleedahay Dhaqaalaha
6. Saamaynta ay kuleedahay Gaadiidka
7. Beeraha Nasashada Dadwaynaha (Qiimeynta Qeybta 4aad(f))
8. Kafaaloodka Maaliyada
9. Waxyeelada Dadban iyo Saameynta Guud
10. Cadaaladda Bay'ada
11. Qiimeynta Talooyinka Kale
12. Xiriirinta Hay'adaha Dawlada iyo Faalooyinka

### Macluumaad kale oo xiriir laleh barnaamijkaan ayaa lagu soo bandhigay qaybta gadaal uga lifaaqan, sida:

- Macluumaad farsamo oo kaabaya warbixinta
- Muuqaalo kusaabsan fikrada Injineernimada
- Ogeysiisyada dadweynaha
- Xariirka Dadwaynaha
- Liiska dadka soo diyaariyay iyo kuwa loogu talo-Galay
- Liiska tixraaca



*Light Rail Transit (LRT) (Gaadiidka Tareenku) waxay ka mid tahay talooyinka lagu qiimeeyay DEIS. Talooyinka kale ee lagu qiimeeyay DEIS waxaa ka mid ah kor-uqaadida adeegga baska iyo talada ah in aan waxba la dhisin.*

Macluumaad badan oo ku saabsan Mashruuca Southwest Transitway iyo DEIS waxaa laga helaa internetka:

<http://www.southwesttransitway.org>

Bogga mashruuca Dagmada Hennepin

<http://www.swlrt.org>

Bogga mashruuca Metropolitan Council